

Somali Language




# radon

Tusmo kooban oo ku saabsan sida  
gurigaaga looga ilaaliyo radon



# Waa maxay radon?

Radon waa gaas midab iyo ur midna aan lahayn oo ku jira ciida kuna badan Minnesota. Maadaama ciidu daloollo leedahay, radon ayaa kasoo baxda ciida kadibna gasha guriga. Gaaska ayaa ku badan kara hawada aan neefsano taasoo abuuraysa dhibaato caafimaad.



# Waa maxay cilada caafimaad?


Gaaska Radon ayaa noqdo unugyo yar oo sun wata marka aan neef ahaan u liqnana unugyadaan yaryar ayaa waxyeelo u gaysan kara sanbabadeena. Inaad muddo dheer liqayso gaaska radon ayaa keenaysa kansarka sanbabada.



Gudaha Minnesota, in ka badan **labo kamid ah shantii guri ayaa leh heerarka radon ee keena dhibaato wayn oo caafimaad.**

Labo ka mid ah shantii Guryaha ayaa radon sare ku leh Minnesota.

Boqollayda Guryaha Minnesota ee Laga baaray Radon gaaraysa  
 $\geq 4$  pCi/L



## Waa maxay heerka badqabka leh ee radon?

Heerar kasta oo radon ayaa keenaaya khatar caafimaad mana ahan wax suuragal ah in lagadhigo heerka radon eber. Qaabka ugu haboon waa in la yareeyo heerka radon sida ugu badan ee macquulka ah, Wakaalada Ilaalinta Deegaanka (EPA) ayaa ka dhigta heerka la rabo in wax laga qabto 4 pCi/L (cabirka radon ee halkii liitar oo hawo ah). **Heerka 4 pCi/L ama ka badan ayaa lagu talinayaa in nidaamka yaraynta radon ta lagu xiro guriga si loo yareeyo heerka radon.**

## Maxaan samayn karaa?

MDH ayaa ku talinaysa in dhammaan dadka reer Minnesota ay gurigooda ka baaraan Radon. Baaritaanka radon ayaa ah qaabka keliya ee lagu ogaan karo cadadka radon ta ku jirta gurigaaga. Adiga ayaa ka baari kara gurigaaga ama waxaad shaqaalaysiin kartaa xirfadle. Natiijada baaritaanka lagu sameeyay dhismaha ayaa kaa caawinaaya inaad go'aansato inaad u baahan tahay yaraynta heerarka radon ta gurigaaga iyo in kale.

# Ka baar radon



Labada baaritaan ee aasaaska u ah radon ta ee la heli karo waa baaritaanka mudada dhaw iyo kan mudada dheer. **Samee baaritaanka mudada gaaban marka hore.** Waaxdaada caafimaadka maxaliga ah ama wakaalada dawlada ayaa kiishadaha baaritaanka kugu siin karta qiimo jaban. Xog ku saabsan meesha aad ka helayso baaritaanka radon ayaad ka eegi kartaa webseedka MDH. Marka aad guri iibsanyso iskuday inaad shaqaalaysiiso xirfadle shatiyaysan si uu u baaro radon ta. Dhabarka danbe ee tasmadaan waxaad ka helayso talaabooyinka lagu talinaayo il la qaado kadib natiijada baaritaanka.

# Yaree radon ta - haddii ay sarayso



Haddii radon tu badan tahay, qabso xirfadle u shatiyaysan radon si uu kuugu rakibo nidaamka yaraynta. Nidaamyada yaraynta radon ayaa adeegsada marwaxad si gaaska looga so jido ciida kadibna banaanka looga bixiyo guriga. Dhammaan nidaamyadu waa inay radon ta ka hoos mariyaan heerka talaabada lagu qaadaayo ee EPA oo ah 4 pCi/L. Marka aad rakibto, xirfadlaha ruqsada leh ayaa ku dhajin doona calaamad nidaamka. Wac MDH haddii aad qabto su'aalo ama doonayso inaad codsato kormeer.

# Xog dheeri ah ka fiiri



**mn.gov/radon** – Xog ku saabsan radon iyo meesha aad ka helayso baaritaanka radon.  
**mn.gov/radonpro** – Liiska xirfadleyaasha u shatiyaysan radon.

# Tilmaamaha Baaritaanka Radon

## — Ku bilow baaritaanka — mudada kooban

### Fahanka natiijada baaritaanka koobaad

#### Natiijada (pCi/L)

Wax ka yar 2

Inta u dhexaysa 2 ilaa 8

8 ama ka badan

#### Ficilka

Dib u baar 2 ilaa 5 sano kadib

Samee baaritaan labaad, mid muddo kooban ama mid muddo dheer

Samee baaritaan kale oo muddo gaaban ah

### Fahanka natiijada baaritaanka labaad

#### Natiijada (pCi/L)

Wax ka yar 2

Inta u dhexaysa 2 ilaa 4

4 ama ka badan

#### Ficilka

Dib u baar 2 ilaa 5 sano kadib

Iskuday yaraynta

Yaree

*Go'aansiga yaraynta waa in lagu saleeyo natiijada baaritaanka mudada dheer ama celceliska labada baaritaan ee mudada gaaban.*

*Kala iibsiga guryaha, go'aanka yaraynta waa in lagu saleeyo baaritaanka la socoshada joogtada ah ama celceliska baaritaannada labada ah ee gaagaaban oo la isku garab wado.*



Qaybta Hawada Gudaha (Indoor Air Unit)

PO Box 64975

St. Paul, MN 55164-0975

651-201-4601

[health.indoorair@state.mn.us](mailto:health.indoorair@state.mn.us)

[mn.gov/radon](http://mn.gov/radon)

La saxay 6/2024

**Radon**

